

SINAANTA IYO WAXBARASHADA HEER SARE

UJEEDADA

Ardayda, shaqaalaha iyo daneeyayaasha Dugsiga Degmada Magaalada Rochester (RCSD), waxay keenaan asalkooda shaqsi ahaaneed dugsiyadeena iyo RCSD way kaga qanisan tahay. Mid kasto oo iyaga ka mid ah waxa uu leeyahay rajo sharci ah oo ah in uu helo jawi waxbarasho oo caqabad la'aan ah oo ka hortagaayo saamaynta waqtigan iyo taariikheed ee cunsuriyada, taas oo ah sababta asalka u ah eexasashada, naceebka iyo takoorka. Qarniyo badan, saamaynta waxay ahayd mid la saadaalin karo natiijooyinka waxbarashada ee ku salaysan jinsiyada, fasalka, dhaqaalaha bulshada, jinsiga, qowmiyada, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, garashada/kartida jireed, faseexnimada luqadaha kala duwan, iyo diinta.

Ardaydeena waxay mudan yihiin jawi waxbarasho oo ixtiraam leh oo kala duwanaanshaha jinsiyadooda iyo qowmiyadooda lagu qiimeeyo iyo loo isticmaalo hanti ahaan waxbaris iyo waxbarasho, iyo gacan ka geysato natiijooyin guul ee tacliimeed. Waxaa aaminsanahay in masuuliyada guusha ardayga ay si weyn u wadaagaan shaqaalaha RCSD, maamulayaasha, macalimiinta, bulshada iyo qoysaska.

Waa waajibbaadka RCSD in ay soo dhaweeyaan kala duwanaanshaha ka dhex jiro Dagmadeena iyadoo si firfircoon u baabi'inayso dhaqamada sii fogeeyo kala duwanaanshaha ardaydeena sidaas darteed si dhamaan ardayda u helaan fursado waxbarasho oo tayo sare leh. Farqiyadaani waa wax aan la aqbali karin.

Waa inaa si toos ah ugu hortagnaa cunsuriyada machadaha oo sheego saadaalinta guul hoose ee tacliinta ardayda midabka. Ciribtirka raadka islaweynida iyo cunsuriyada isloolka Degmadeena waxay kordhin doontaa guul, oo ay ku jirto in lagu qalinjabiyo watiga ee **dhamaan** ardayda, iyadoo la yareynaayo farqiga u dhexeeyo ardayda ugu waxqabadka badan iyo kuwa ugu hooseeyo.

Fikrada sinaanta waxbarashada waxay dhaaftaa sinaan - halkaas oo dhamaan ardayda loola dhaqmo si isku mid ah. Badalkeeda, sinaanta waxbarashada dhabta ah waxay kobcisaa jawi aan caqabad lahayn halkaas oo dhamaan ardayda ay heli karaan waayo aragnimo tayo sare leh oo siman iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu koraan waayo aragnimadaas, iyadoo aan la fiirineynin meesha ay ku nool yihiin, isirkooda, fasalka ama sifooyinka kale ee shaqsi ahaaneed sida caqiidada, midabka, diinta, abtirska, asalka qarameed, da'da, heerka dhaqaalaha, jinsiga, nooca galmada oo ay ku jiraan muujinta jinsiga ama aqoonsiga, xaalada uurka, muuqaalka jireed, joogitaanka miirka, naafada maskaxeed ama jireed, ama isticmaalka hagitaanka eey tababaran ama xayawaan u adeego qof naafo ah.

RCSD waxay aqoonsan tahay in arimaha bulshada iyo taariikhiga ah ee adag ay gacan ka geystaan sinaan la'aanta ka jirto degmadeena. Si kastaba ha ahaatee, halkii aan ka sii wadi lahayn sinaan la'aanta ka dhalato khilaafaadka, waa in aan wax ka qabanaa oo aan ka gudubnaa sinaan la'aanta, anaga oo siinayno dhamaan ardayda waxbaris tayo sare leh iyo taageerooyin tacliimeed iyo bulsho oo bartilmaameedsan, taas oo kordhinayso fursadaha lagu guuleysto.

Sinaanta dhabta ah waxay ku xirantahay kala soocida qoondaynta kheyraadka ee ku salaysan baahida ardayda, bixinta taageerooyin gaar ah oo bartilmaameedsan, manhaj ka tarjumaayo iyo u mahad celinaayo hida dhaqameedka hodanka ah ee ardayda degmada, iyo maalgelinta hirgilinta dhacaan soo celinta halkii lagu fulin lahaa sharciga iskoolka iyo/ama tilaabooyinka ciqaabta. Ardayga taariikhdiisa iyo dhaxalkiisa lagu mahadiyo, la xuso, iyo loo isticmaalo qalab waxbarid iyo waxbarasho ayaa si ka sii wanaagsan wax u baran doono iyo heli doono awood siinta waxbarasho adag iyo cusub.

Si loo sugo aragtidaan, RCSD waxay diirada saari doontaa baahida gaarka ah ee arday kasto, iyo kobcinta qiimaha caalamiga ah ee kala duwanaanshaha, sinaanta, ka mid noqoshada iyo waxbarashada heerka sare

iyadoo eex la'aan, cuqdad, ama takoorid. Awoodeena ugu sareyso ee aan ku gaari karno sinaanta waa taageerida iyo kor u qaadida faahfaahinta waxbarida iyo waxbarashada.

CIRIBTIRKA NIDAAMKA CADAALAD LA'AANTA

Si loo joojiyo nidaamyada sii wado sinaan la'aanta, RCSD waxay:

1. Martiqaadaysaa iyo ku daraysaa dadka dhamaan fasalada la ilaaliyo si ay u baaraan arimaha oo ay u helaan xalal la qabsan karo, kuwaas oo wax ka qabto sababaha asaasiga ah iyo nidaamyada, halkii ay ka ahaan lahaayeen xalal farsamo, kuwaas oo bixiyo xalal xaaladeed oo hal mar ah;
2. Kobcisaa shaqsi ahaaneed, urureed iyo aqoonta shaqaalaheeda si ay awood ugu yeeshtaan inay wax ka qabtaan doorka iyo joogitaanka cunsuriyada labadaba qaababkeeda qarsoon iyo kuwa cad;
3. Ka ciribtiraysaa dhamaan dhaqamada u horseedaayo saadaalinta isirsoocida iyo iskudheelitir la'aanta dhamaan dhinacyada waxbarashada iyo maamulka (tusaale ahaan, ku dhaqanka xad dhaafka ah ee anshaxa ardayda midabka ah, matalaadooda xad dhaafka ah ee Waxbarashada Gaarka ah, iyo matalaad yarida ay ku leeyihiin Waxbarashada barnaamijyada kala duwan ee Waxbarashada Sare); iyo.
4. Balanqaadaysaa si loo hubiyo in kala duwanaanshaha, sinaanta, ka mid noqoshada iyo heer sare ay yihiin mabaadi'da lagama maarmaanka u ah nidaamka iskoolkeena si buuxdo loogu daraayo mabaadi'daan dhamaan siyaasadaheena, barnaamijyada, hawlgalada iyo dhaqamada.

HUBIINTA NIDAANKA SINAANTA

RCSD waxa ay fulin doontaa oo ay hogaamin doontaa qorshe sinaan oo ku dhisan sadex tiir oo muhiim ah: Qoyska, Ardayga iyo Ka Qaybgalka Bulshada; Hogaaminta; iyo Waxbarida iyo Waxbarashada.

1. Qoyska, Ardayga iyo Ka Qaybgalka Bulshada

Shaqaalaha RCSD waxay hormarin doonaan iyo hirgelin doonaan hab dhaqamada loo siman yahay ee ardaydeena, qoysaskooda iyo xubnaha kale ee bulshada oo ay ku jiraan:

- a. Ujeedo ahaan raadinaayo iyo ay ku jiraan aragtiyaha kala duwan ee ardayda ee hormarinta iyo hirgelinta dhaqamada iyo manhajka waxbarida iyo waxbarashada ee ka jawaabaayo dhaqan ahaan;
- b. Ka qaybgelinta qoyska iyo xubnaha bulshada shaqaalaha iyo ardayda, degmada oo dhan, iyo dugsiga iyo goobaha barnaamijka, hormarinta iyo hirgelinta iskaashiga dhaqan ahaan iyo waxtarka leh ee ka dhexeeyo guriga iyo dugsiga;
- c. Ku martiqaadida iyo ka mid noqoshada xubnaha bulshada si ay u keenaan aragtiyo dhaqameed oo kala duwan si loo baaro iyo loo xaliyo arimaha soo baxo; iyo
- d. Ka qaybgalka, oo ay ku jiraan iyo lashaqeynta qoysaska, ardayda, dadka deegaanka, bulshooyinka, iyo daneeyayaasha maadaama Gudigaan oo aqoonsan yahay in ka qaybgalkooda firfircoon ay muhiim u tahay mas'uuliyada u gaarka ah Gudiga ee maamul hufan oo simaan.

2. Hogaamin

Hogaamiyayaasha RCSD waxay hubin doonaan in sinaanta ay hagto ficiladooda iyo ficilada kuwa ay kormeeraan ee adeega natiijooyinka tacliimeed ee la hagaajiyay iyagoo:

- a. Qorista xubin cusub, shaqaaleysiinta, taageerida, haysashada iyo hormarinta joogtada ah ee shaqaale wax ku ool ah oo ka tarjumaayo kala duwanaanta gudaha ardayda. RCSD waxay shaqaaleysiin doontaa sinaan miir leh iyo maamul karti leh dhaqan ahaan, shaqaalo waxbarasho iyo taageero.
- b. Bixinta karti dhaqan ee dhamaan shaqaalaheeda;
- c. Ku qaabaynta sinaanta jinsiyada waxa la sheegay, waxa qoran, iyo waxa lagu qabto samaynta ganacsiga RCSD;
- d. Ka bedelida hab dhaqamada hawl fulinta sinaan la'aanta laguna bedelo habab taageeraayo hirgelinta siyaasadaan;
- e. Diirada saarista nidaamyada mas'uulnimada iyo cabirada natiijooyinka sinaanta jinsiyadeed;
- f. U qoondaynta sanad walbo RCSD dhaqaalaheeda badan, raasamaal iyo khayraadka dadka si siman; iyo
- g. Fududeynta helitaanka manhaj siman oo tayo sare leh iyo waxqabadyada manhajka ka baxsan, adeegyada bulshada, umeerinta, iyo fursadaha kobcinta.

3. Waxbarida iyo Waxbarashada

Shaqaalaha RCSD waxay si wada jir ah ugu shaqayn doonaan si ay u kordhiyaan awoodooda shaqsi ahaaneed iyo awoodooda wadareedba si ay si wax ku ool ah u baraan ardayda kala duwan iyo isbedelada tirada ardayda iyagoo:

- a. Xaqiijinaayo jawi dugsi oo togan iyo tacliin ahaan adag oo ka qayb qaataan dhamaan ardayda;
- b. Iskaashi macalimiin ahaan iyo maamulayaal ahaan si loo abuuro iyo loo hirgeliyo dhaqan jawaab celin leh, dhaqamo waxbarasho oo loo siman yahay, manhajka iyo qiimaynta;
- c. Ciribtirka dhaqamada u horseedaayo matalaad yarida koox kasto oo arday ah, gaar ahaan iyada oo diirada la saaraayo fulinta waxbarasho tayo sare leh, abuurista jawiyo xaqiiqsan iyo soo dhawayn leh, iyo yaraynta isticmaalka aan loo meel dayin ee dhaqamada edbinta ee ka saarista ardayda madowga iyo maariinta ee degmada ;
- d. Abuuritaanka dariiqooyin waxbarasho oo badan oo balaarinaayo helitaanka fursado waxbarasho oo tayo sare leh iyo guusha nolosha oo dhan;
- e. Bixinta manhaj tayo sare leh, dhaqan ahaan haboon iyo jawaab celin leh, oo ay ku jiraan daraasadaha Afrikaanka iyo Latinx ee dhamaan ardayda iyo macalimiinta, iyada oo aan loo eegin qaababka waxbarasho; iyo

- f. Aqoonsiga, hormarinta iyo ku dhaqanka hab dhaqamada waxbarasho ee loo siman yahay kuwaas oo muujinaayo farqi wanaagsan ee ardayda iyo kooxaha ardayda si loo yareeyo daldaloolada natiijada waxbarasho ee baahsan iyo joogtada ah.

Tixraac aan toos aheyn: Mamnuucida Takoorka ama Dhibaataaynta Ardayda ama Shaqaalaha (0100) Qaamuuska Sinaanta iyo Wanaajinta Waxbarashada (105-E1)

Tixraac: Wax ka Bedelka Dastuurka Mareykanka XIV, §1 (Ilaalin siman)
20 U.S.C. §1703 (Fursad waxbarasho oo siman)
25U.S.C. §452, iyo kuwa xiga. (Xeerka Johnson-O'Malley)
42 U.S.C. §2000c, iyo kuwa xiga. (Qaybta)
42 U.S.C. §2000d, iyo kuwa xiga. (Cuqaal VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964)
42 U.S.C. §2000e-2 (Cuqaal VII ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964)

Xasuus qoraal: La qaatay March 29, 2018 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2017-18: 555; Wax laga bedelay April 27, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 627; Wax laga bedelay March 26, 2026 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2025-26: 491

ct/sg